# Geedka Garlic Mustard

## Garlic Mustard

***Alliaria petiolata*** **Qoyska Mustard**

**Cawska Sunta ah ee Heerka A: Dabargoyn ayaa la Rabaa**

### Tilmaamo lagu Aqoonsado

- Caadiyan dhererkiisu waa 2 to 3 feet, wuxuu gaari karaa ilaa 6 feet.
- Wuxuu sida caadiga ah soo saaraa jirid ubax bixisa oo leh afar, ubax oo yar, oo jaalle ah oo ku yaala dusha sare ee jiridaha caleemaha leh
- Wakhtiga gu'ga xididada iyo caleemaha cusubi waxay leeyihiin urta toonta
- Xididku sida caadiga wuxuu leeyahay qaab gaar ah uu eg 'S' or 'L' halka ka hooseysa jirida
- Caleemaha hoose waxay leeyiihiin geeso soo wareegsan waxayna leeyihiin qaabka kelyaha
- Caleemaha sare waa saddex xagal ilko fiiqan ku leh geesaha caleenta
- Caleemuhu waa kuwo siman, oo aan qalafsanayn
- Qolofta iniinyuhu ku jiraan waa mid dheer oo dhuuban



*Ubuxu waa mid yar oo caddaan ah oo leh afar qaybood.*



*Caleemuhu waxay leeyihiin qaabka kelyaha ama wadnaha oo is dhaafdhaafsan, geeso ilko leh.*



*Geedka garlic mustard wuxuu bara bixiyaa dhirta dhulka loogu yimid.*

### Bayoolajiga

Waa geed aan dhulka u dhalan oo ku baxa laba sano ama waa geed sanadle ah oo jiilaalka baxa. Geedaha yaryar ee iniinyaha waxay noqdaan oo ay sku bedelaan caleemo hoose marka la gaaro bartamaha xagaaga; waxay ka gudbaan xilliga jiilaalka si ay u ubax u bixiyaan xilliga gu'ga ee xiga. Wuxuu ubax bixiyaa horraanta Abriil ilaa Maajo. Waxaa faafiya iniinyaha; wuu is faxlin karaa ama wuxuu isku gudbiyaa faxalka. Wuxuu soo saari karaan in ka badan 60,000 oo iniinyo ah halkii yard halkii yard ee laba jibbaaranba. Iniinyuhu waxay carrada ka muuqdaan ugu yaraan muddo ilaa 10 sano ah.

### Saameynta

Wuxuu soo saaraa kiimiko xakamaysa koritaanka dhirta kale, fangaska iyo balanbaalista weli heerka dirxiga joogta. Wuxuu barakiciyaa dhirta dhulka loogu yimid iyada oo sababtu tahay faafitaankeeda degdega ah, qaabkeeda koritaanka ee isku cufan, iyo awooda shaqo ee iniinta dhaadheer.

### Faafidda

Isaga oo asal ahaan ka soo jeeda Yurub, Waxaa laga helaa Seattle, Bellevue, Webiga Cedar, iyo dhowr meelood oo kale oo ku xeeran Degaanka King. Iniinyuhu waxay ku soo dhacaan meel u dhow dhirta dhashay iniinyaha ah halkaasi oo ay dhaqaajiyaan dadka, xayawaanka iyo gawaaridu. Waxaa lagu yaqaanaa in uu si degdega u faafo isaga oo iskaga gudba marinnada iyo wadiiqooyinka la maro una gudba goobaha keynta ah. Waxaa loo maleynayaa in uu ku faafo isticmaalka geedaha la jarjaro, kabaha, ama ay qaadaan dadka, xayawaanka ama qalabka u kala socda beeraha nasashada. Wuxuu ka bixi karaa meelaha hooska cufan leh ama meelaha qoraxda leh.

### Maxaad Samayn Kartaa

La xiriir Barnaamijka Xakamaynta Cawska Sunta ah haddii aad geedka garlic mustard ku aragto dhulalka dadweynaha ama hanti kuu dhow. Maadaama uu cawska sunta ah aanu ahayn ahayn mid aad ugu baahsan tahay Degaanka King, in la dabargooyaa waa mid guurtagal ah. Muhiimadu waa ka hortagga faafitaankiisa iyo ka saarista dhirta ee dhammaan goobaha la yaqaan. Naga caawi adiga oo isla naftaadu wax ka ogaanaya dhirtani iyo degaanka ay ka baxdo. Si joogto ah ula soco goobaha markasta oo ay suurto gal tahayna meesha ka saar dhirta ka hor inta aysan iniinyaha bixin.

## Hababka loo Xakamaynayo

Hababka lagu xakamaynayo waa in la isticmaalaa sanado badan si ay u noqdaan kuwo lagu guulaysto iyadoo sababta tahay iniinyaha oo carrada ku noolaado wakhti dheer.

***Ka hortagga:***
Si joogta ah ula soco goobaha aad keentay geedaha la jarjaro, carrada wax la kor saaro, geedaha la jarjaray ee wax lagu qurxiyo ama qaruuraha degaannadaada ka baxsan; baabuurta nadiifta ah iyo qalabka. Waxaad wakhtiga gu'ga fiirisaa (geedaha yaryar) oo leh caleemo soo wareegsan. Kabaha waaweyn tirtir marka aad ka tegayso meesha wax soo gaareen.

***Gacanta laga qabanayo:***
*Geedaha qaangaarka ah*—gacanta dhulka uga soo saar ka hor inta aysan iniinyuhu sameysmin. Xaqiiji in aad ka soo saarto xididada; dhirtu waxay ka soo biqli doontaa geedka korkiisa haddii ay kala daadato. *Caleemaha soo wareegsan*—in gacanta dhulka looga soo saaro LAMA soo jeedinayo. Caleemaha soo wareegsani waxay u badan yihiin in ay ka soo go'aan xididka, iyaga oo geedka u ogaalayaa in uu dib u soo biqlo. Dhulka ka soo qod caleemaha soo wareegsan ama isticmaal kiimikada wax lagu buufiyo (hoosta fiiri). Bac ku rid oo tuur dhammaan waxyaabaha dhirta ah. Ha ku ridin qashinka barxada yaala.



*Ka hortaggu waa mid aad gaari karto. Gacanta dhulka uga soo saar geedaha qaangaarka ah markasta oo ay suurto gal tahay.*

***Farsamo:***
In wax laga beero dhul ballaaran ayaa raad fiican yeelan kara laakiin waxaa laga yaabaa marka hore in iniinyo badani ka soo biqlaan. Jarida la jarayo waxay dhiirigelin madaxa sare ee xididada iyo geesahooda. **Ka taxadar: geeduhu mar kale ayay ubaxa soo bixin doonaan marka la jaro ka dib. Wixii dhirta geedka garlic mustard ee la jaray ama la soo saaray waa in bac lagu ridaa oo la tuuraa, xataa haddii ay ku jirto xaalad aanay baxaynin. Waxay weli sameyn karaan iniinyo muuqda.**

***Kiimikada:***
Waxaad raacdaa astaamaha ku qoran adigoo kaliya isticmaalaya waxyaabaha ku habboon ama loo ogol yahay goobta. Kiimikada wax lagu buufiyo waxay waxtar u leedahay caleemaha soo wareegsan. In xilliga gu'ga ama dayrta lagu buufiyo kiimikada wax lagu buufiyo ee glyphosate (sida Roundup) ama triclopyr (sida Garlon 3A ama Brush Killer) ayaa muujisay in ay tahay kiimikada wax lagu xakameeyo ee ugu waxtarka badan. Waxyaabaha ka kooban 2,4-D (sida Weed-B-Gone iyo Crossbow) si weyn uma xakameeyaan geedka garlic mustard.



***Geedka money waxaa inta badan waxaa lagu qaldaa geedka garlic mustard.***

## Suuro galnimada in la isku qaldo:

### Marka uu leeyahay caleemo soo wareegsan, geedka garlic mustard wuxuu u egyahay dhowr dhirta dhulka loogu yimid ama qaarka mid ah cawska caadiga ah.

Kuwani waxaa ka mid ah geedka wild violets (*Viola* spp.), fringecup (*Tellima grandifora*), mallow (Malva sp.) iyo geedka piggyback (*Tolmiea menziesii*). Marka geedka garlic mustard uu dheeraado, waxaa mararka qaarkood lagu qaldaa dhirta nipplewort (*Lapsana communis*), kaasi oo leh ubax jaalle ah halkii uu ka noqon lahaa caddaan. Geedka money plant (*Lunaria annua*) waa la mid marka la eego muuqaalkiisa wuxuuna mararka qaarkood leeyahay ubax cad, laakiin wuxuu leeyahay qolofta iniinyuhu ku jiraan wareegsan, oo siman. Hab kale oo lagu sheegi karo kala duwanaanshaha u dhexeeya geedka garlic mustard iyo kuwa eg waa in la taabto caleemaha. Dhirta ay inta badan isku eg yihiin waxay leedahay caleemo qalafsan ama timo halka caleemaha geedka garlic mustard ay yihiin kuwo siman inta badana aan timo lahayn.